



Daryeelka Caafimaadka Degdegga ah

Emergency Medical Assistance (EMA)

Maxay tahay Gargaarka Caafimaadka Degdegga ah?

Gargaarka Caaafimaadka Degdegga ah waa barnaamij daryeel caafimaad ee dadweyne oo loogu tala galay dadka aan muwaadiniinta ahayn oo ay haysato xaalad caafimaad oo deg-deg ah. Gargaarka Caaafimaadka Degdegga (EMA) ah waa bixiyaha caafimaad ee “lagama maarmaanka ah”. Taas micneheedu waxa weeye dadka keliya ee aan heli karin gargaar caafimaad oo ay ugu wacantahay sharciga ay waddanka ku joogaan (sida’ soo galooti aan wax dukumeenti haysan, arday ajnabi ah, iyo shaqaale ajnabi ah) waxay helayaan EMA. EMA waxay bixisaa daryeelka caafimaadka degdegga ah oo keliya.

Haddii aadan ahayn muwaadin oo dakhligiisu hooseeyo oo adan heli karin gargaar caafimaad (MA) oo caadi ah, oo ay sabab u tahay sharciga aad waddanka ku joogtid, barnaamijkaani waa ku caawin karaa si aad u hesho daryeel caafimaad. Degmada ayaa go’aan ka gaaraysa cidda xaqa u leh in ay hesho , gobolkuna wuxuu go’aan ka gaarayaa waxa ku jira daryeelka caafimaadka.

Fiiro gaar ah: Gargaarka caafimaad ee Degdegga KUMA jiro gargaarada kale ee sharci kasta oo ku saabsan mas’uuliyadda dawladda ee dadweynaha.


Ma heli karaa EMA?

Si aad u hesho Gargaar EMA, waa in aadan ahayn muwaadin, **OO** aad deggan tahay Minnesota. Waxaad tahay deggane haddii aad ku nooshahay Minnesota aadna Minnesota u haysatid gurigaaga. Haddii meel kale aad u haysato gurigaaga, oo aa booqasho kooban oo keliya ku timid Minnesota, inta badan ma tihid qof deggan Minnesota.

Maxay tahay xaalad caafimaad oo deg-deg ah?

“Xaalad Caafimaad oo deg-deg ah” waa jiro aad u adag ama dhibaato caafimaad oo keeni karto

- In ay ku geliso caafimaadkaaga khatar aad u adag, ama
- Kugu keenaysa dhaawac (dhib) addag in jirkaagu caadi u shaqeeyo, ama
- Ku keenaysa dhaawac ama dhib badan in xubin ka mid ah jirkaagu shaqayn waayo.



Waxaa ku jira xaaladaha sabab u noqda xanuun aad u badan, sida laf jabtay, ama calaamado degdeg ah oo khartar ah sida xanuun ku yimaada xabbadka (shafka), madax xanuun aad u darran ama arragga indhaha oo aan fiicnayan (caad kaa fuulay). Kuma jiraa jirooyinka aan badi laga bogsan, laakiin waa ku jiri karaan xaladaha keeni kara degdeg haddii aan la daaweyn, sida dadka qaba kaadi macaanka ee ku xirran dawada insuliinka ee lagula tacaalo kaadi macaanta, HIV gaaray heer addag, kelyaha oo ku fariista una bahan dhaqid, iyo kansar u baahan in si degdeg ah wax looga qabto.

Xitaa haddi aad u baahan tahay, EMA ma dabooli karo in xubin lagaa beddelo. Laakiin hadda , Minnesta waxay daboosha in kelida loo beddelo dadka ku jira EMA. La hadal dakhtarkaaga haddii aad u malaynayso in arrintaani ku khusayso.

Maxaa ku dhacaya uureyda?

Gargaarka Caafimaadka (MA) ah ee Minnesota wuxuu bixiyaa **dhamaan** dumarka uurk leh oo dhan ee dakhligoodu hooseeyo, xitaa haddii aadan haysan wax aqoonsi ah, ama aad haysto sharciga dal ku joogidda oo ku meel gaar ah. Ceymiska Gargaarka Caafimaadku waxay bilaaban kartaa isla marka aad uur yeelato waxayna gaaraysaa illaa 60 maalmood dhalhada ka dib.

Haddii aad uur leedahay, ama aad u ma laynaysid, ka codso xafiiska gargaarka dadweynaha, isbitaalka, ama xarunta caafimaad ee qorshaynta qoyska gargaar caafimaadka ee dumarka uurka leh. Akhri xogta urursan ee [Daryeelka Caafimaadka Degdegga ah.](#)

Daryeel Caafimaad oo nooc ah Ayaan helayaa ?

EMA waxay keliya oo kaa bixinaysaa daryeelka caafimaad ee aad u baahantahay in xaaladda caafimaad ee degdegga ah wax lga qabto. Ma bixinayso kharajka kale ee caafimaad, sida baaritaanka caafimaad, caafimaadka ilkaha, ama daawada xaaladaha aan degdegga ahayn.

EMA waxay bixin kartaa daryeelka aad ka heshay cisbitaalka, ama qolka degdegga ah. EMA waxay kaloo bixin kartaa daryeelka ama daawadii lagaa siiyay xafiiska dhakhtarka, ama xarunta caafimaadka ka dib markii aad ka baxday cisbitaalka ama qolka degdegga ah.



Dhakhtarkaagu waa in uu buuxiyaa foomka loo yaqaan "Caddaynta Codsiga qorshe daryeel caafimaad" oo sharaxaya sida gargaarka caafimaad ee aad ku soo qaadatay cisbitaalka dibadiisa ay la xiriirto xaaladda caafimaad ee Degdegga ah.

Waxaad EMA ku dari karta habab kale oo aad ku bixiso daryeelkaaga caafimaad. Haddii barnaamij kale sida Daryeelka Minnesota (MinnesotaCare) ama daryeelka samafalka ay kaa bixiso daryeelka caafimaad ee caadiga ah, ama ka heshid xarun caafimaad daryeel caafimaad ee lacag la'aan ah, EMA waxay weli bixin kartaa daryeelkaaga caafimaad ee degdegga ah.

Ma jiraa wax xad ah ee dakhligaaga ama hantidaada?

Haa, Gargaarka Caafimaadka Degdegga ah (EMA) xadka dhakhliga iyo hantida waxay la mid tahay xaddiga tan loo isticmaalo gargaarka Caafimaadka (MA). Waxaad ka heli kartaa [ixaddigaas \(limits\)](#) mareegta Waaxda Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota ee <https://mn.gov/dhs>. barta baarista ku qor dakhliga iyo hantida oo guji isla cinwaanka ee ku jira liistada soo baxda. *(ingiriisi kaliya)*

- Haddii dakhligaagu ka sareeyo xaddiga dakhliga, waxaad “kharjka ku bixisaa” caafimaadka qeyn badan oo dakhligaaga ka mid ah.
- Haddii aad dalka ku timid damaanad, dakhliga qofka ku soo damiintay lama xisaabay.
- Xaddi ma laha hantida caruurta

Sidee u codsadaa?

Si la mid ah gargaarka Caafimaadka (MA), ayaad uga codsan kartaa EMA Xafiiska Adeegga Bani'aadamka ee Degmada (“Gargaarka Dadweynaha”). Waxaad kaloo ka codsan kartaa cisbitaalka. Haddii aad si darran u jirrantahay, ama aad dhaawac tahay, shaqaalaha cisbitaalka ayaa kuu codsan kara.

Haddii aad mudantahay EMA, waxaad ku bixin kartaa biilasha daryeelka caafimaad ee Degdegga ah ee 3di bilood ee ka horeyay inta aadan codsan. Taas micneheedu wax weeye in aad caawimo ka helaysid bixinta biilasha caafimaadka ee aad horey u qabtay. Markale haddii aan celinno, EMA waxa keliya ee ay bixisaa waa daryeelka caafimaadka ee dedg-degga ah, sida qolka deg-degga ah iyo qaliinka Degdegga ah.

Macluumaadkaaga oo dhan waa qarsoodi (sir). Lalama wadaagi karo cid kasta ee dowladda ah, ama wakaaladaha gaarka loo leeyahay. Ma aha in aad keento lambarka Badbaadada Bulshada. Waxay **keliya** ku weydiin karaan sharciga aad waddanka ku joogtid si ay u xaqiijiyaan in aad buuxisay shuruudihii lagugu siin lahaa qaar ka mid ah barnaamijyada daryeelka caafimaadka dadweynaha.



Caawimaadda Meelaha kale:

- Waydii wakiilka Waaxda Xuquuqda Aadanaha ee degmada meelaha aad ka heli kartid daryeel caafimaad oo la’cag la’aan ah ama jaban.
- Si aad u heshid wakiilada kale ee kaa caawimi kara helitaanka adeeg caafimaad oo jaban ee xaafaddaada ku yaal ama kaa caawima codsiga gargaarka caafimaadka (MA) wac 2-1-1

gobolka oo dhan. Ama ugu dir fariin boostada xaafadda aad deggantahay 898-211 ama si xirrir ah la sheekayso <https://www.211unitedway.org/about-211/somali/>.

- Ka wac xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ee deegaankaaga 1-(877) 696-6529. Ama ka eeg caawimaad barnaamijyadda kale ku jira barta: www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics.



Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2023 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.